

Soo daahay

Soo daahista bilaa sababta ah:

- Ardaydu waxay imaanayaan qaybta qaabilaada, warbixintii soo daahis ah waxaa lagu qorayaa Magister, ardayguna wuxuu helayaa qoraal ka socda qaybta qaabilaada taasoo ardayga loogu ogolaanayo inuu galo fasalka.
- Qoraal la'aan, ardaygu ma gali karo fasalka. Qoraalkaan waxaa diyaarinaya macalinka, maalintii marka dugsigu soo dhamaanayana, wuxuu macalinkaas la sheegay uga tagayaa meesha loogu talagalay ee fasalka.
- Haddii ardaygu uusan/ayasan wadan qoraal, ardayga waxaa soo celinaya macalinka si uu qoraalkaas uga soo qaato qaybta qaabilaada.
- Nidaamkaas sare wuxuu khuseeyaa dhamaanba xiisadaha ardaygu kasoo daahay.
- Kaddib markii ardaygu soo daaho 3x, ardaygaasu waa inuu xili hore usoo gudbiyaa qaybta soo dhaweynta subaxda xigta, ugu danbayn 8:40 subaxnimo.

Haddii ardaygu uusan u hogaansamin talaabada kore, iskuduwaha soo xaadirista ayaa la xiriiraya macalinka. Waxyar intaas kaddib, macalinku wuxuu la hadlayaa ardaygaan. Haddii uusan wax isbadal ah imaan, waxaa ku xigaya kulan u dhexeeya macalinka, ardayga, iyo waalidka/mas'uulka. Labada xaaladoodba, macalinku wuxuu qorayanayaa warbixin kooban oo wadhadalkaan ku saabsan asagoo ku qoranaya buuga ardayga.

Ogsoonow: Ardaydu waxay soo daahi karaan ilaa 10 daqiiqo; wax walba oo intaas ka danbeeya waxaa loo arkayaa goysmo waxaana loo qorayaa loona dhaqangalinayaa sidaas. Markii ardaygu soo daaho in ka badan 10 daqiiqo, waxaa dhici karta in ardaygu uusan fasalka soo galin. Qaybta qaabilaada ayaa ardayga u gudbinaysa iskuduwaha soo xaadirista, kaasoo ardaygaas ugu qoraya Magister-ka ardayda ee khuseeya inuu sameeyay maqnaansho bilaa sabab ah (goysmo) wuxuuna ardayga ku wargalinayaa talaabada laga qaadi karo. Macalinku sidaas darteed uma ogolaanayo in ardaygu fasalka soo galo. Ardaygu waa inuu sugaa fasalka diyaarinta ee xiisadiisa/xiisadeeda soo socota.

Soo daahista sababta leh:

Markii ardaygu dugsiga yimaado inta lagu jiro mudada casharku socdo sabab la xiriirta inuu balan meel kale ka lahaa, ardaygu wuxuu usoo sheegayaa iskuduwaha soo xaadirista (ama waxaa iskuduwaha soo xaadirista usoo gudbinaya qaybta qaabilaada). Iskuduwaha soo xaadirista wuxuu ardayga siin doonaa wax loo yaqaano "gudbista" macalinka ay khusayso. Ardaygaan waxaa loo ogolaanayaa inuu hadhow fasalka yimaado sabab la xiriirta inuu haysto sabab sax ah.

Sababaha sida dhibaataada ka haysata baasakiilka ama gaadiidka dadweynaha ayaa noqon kara, sababta dhexdeeda, waxaa looga shaqaynayaa qaybta soo dhaweynta. Waxay qorayaan koodhka uu leeyahay waxayna ardayga ay khusayso siinayaan waxa loogu yeero "gudbista," kaasoo loo baahanyahay in loo geeyo macalinka ya khusayso.

Haddii ardaygu dhibataooyin fara badan oo baasakilliisa/keeda gaadiidka dadweynaha ah, ardaygaas waxaa loo gudbinayaa iskuwaha soo xaadirista.

Maqnaanshaha sababta leh

Sabab ku maqan

- Soo sheegista xanuun waa inuu si gaar ah usoo gudbiyaa waalidku/mas'uulku. Waalidka/mas'uulku wuxuu soo gudbinayaa xanuunka ardayga kahor bilaabista xiisadiisa/deeda koowaad asagoo kusoo gubinaya ciwaanka iimaylka, kuna soo diraya Magister, ama teleefoonka. Qaabkaan, macalimiintu waxay ogyihiin maqnaanshaha canugaaga.
- Maqnaanshaha gaaban, sida booqashada caafimaadka ama booqashada wakaalada, waxaa lagu soo gudbinayaa iimaylka ama teleefoonka. Qaybta qaabilaada ama iskuduwaha soo xaadirista ayaa diyaarinaya Magister-kaan.
- Haddii ogaysiiska ardayga aan la bixin, aysan macalimiinta u kala cadayn sababta ardaygu u maqanyahay, maqnaanshahana loo diiwaangaliyo mid aan sabab lahayn.

Waalidku/mas'uulku waa in uu soo sheegaa xanuunka ardayga maalin walba.

Haddii ay khusayso fasax xanuun mudo dheer ah, waa in lagu muujiyaa iimaylka loo dirayo iskuduwaha soo xaadirista. Qofkaanu wuxuu, asagoo la tashanaya macalinka ay khusayso, in loo baahnayahay in ardayga looga baahanyahay in xanuunkiisa maalin walba la sheego iyo in kale.

Maqnaanshaha bilaa sababta ah

Maqan bilaa sabab (goysmo):

- Markii ardaygu bilaa sabab maqnaado (ayadoo aan sabab sax ah jirin) inta lagu jiro fasalka, ardaygu waa inuu xiisadaan fasalka ku sameeyo fasalka loogu talagalay islamarkiiba kaddib fasalkiisa/keeda ugu danbeeya maalintaas.
- Haddii ardaygu uusan u hogaansamin talaabada diyaarinta, waxaa ku xigaysa mudo diyaarin ah maalinta xigta. Ardayga waxaa looga baahanayaa inuu xaadiro diyaarinta ugu badnaan 2 xiisadood maalin walba.
- Haddii ardaygu uusan u hogaansamin talaabada kore, iskuduwaha soo xaadirista ayaa macalinka la xiriiraya. Waxyar intaas kaddib, macalinku wuxuu la hadlayaa ardaygaan. Haddii uusan wax isbadal ah imaan, waxaa ku xigaya kulan u dhexeeya macalinka, ardayga, iyo waalidka/mas'uulka. Labada xaaladoodba, macalinku wuxuu qorayanayaa warbixin kooban oo wadhadalkaan ku saabsan asagoo ku qoranaya buuga ardayga.
- Haddii talaabada diyaarinta aan loo hogaansamin in ka badan laba jeer, waxaa ku xigaya kulan lala yeelanayo iskuduwaha ardayga ama hogaamiyaha macalinka, kaasoo go'aamin doona talaabada dabagalka ee xigta asagoo tixraacaya nidaamka kala saraynta ee ku cad shuruucda dugsiga.